


Minneapolis
Elections & Voter Services
980 E. Hennepin Ave.
Minneapolis, MN 55414

PRSRT STD U.S.
Postage **PAID**
Permit No. 2140
Twin Cities, MN




Minneapolis
Elections & Voter Services

**YourCity.
YourVote.**

Macluumaadka Tilmaamaha Codeeyayaasha ee Minneapolis 2025

Maalinta Doorashada waa Talaado, Nofeembar 4

Goobaha cod bixintu waxaa ay furan yihiin 7 aroornimo - 8 fiidnimo

Goobaha cod bixinta waxa aad kala socon kartaa ka hor inta aadan tagin goobta:

pollfinder.sos.mn.gov



Waa maxay jagooyinka loo codeynayo?

- Duqa Magaalada
- Xubnaha Gudiga Magaalada (dhamaan 13ka)
- Xubnaha Gudiga canshuurta iyo Qiimeynta (2 jago banaan)
- Gudiga Jardiinooyinka (dhamaan 6da degmo & 3 jago banaan)



Waa ayo musharixiinta?

- Kaarka cod dhiibashada oo tusaale ah, ku qor cinwaankaaga mnvotes.gov/myballot
- Waad calaamadin kartaa oo aad keeni kartaa kan tusaalaha ah ee aad soo buuxisay si aad u xusuusato doorashadaada.



Yaa codeyn kara?

Waxa aad ka codeyn kartaa Minnesota haddii aad:

- Heysato dhalashada Mareykanka
- Ugu yaraan da'daadu tahay 18 jir maalinta codeynta (16- iyo 17- way isa sii diiwaan gelin karaan);
- Aad degan tahay Minnesota ugu yaraan 20 cisho ka hor maalinta dhalashada,
- Aadan u xirneyn dambi culus oo lagugu helay; iyo
- Ama uusan jirin amar maxkamadeed oo lagaaga qaaday xuquuqda cod dhiibashada.



Sidee ayaan isu diiwaan geliyaa ama u dhameystiraa is diiwaan gelinta?

Waxa aad iska diiwaan gelin kartaa mnvotes.sos.mn.gov/voterstatuscheck/index



Is Diiwaan Geli Maalinta Doorashada Ka Hor

- Waxa aan idinku dhiiri gelinaynaa in aad is diiwaan gelisaan Maalinta Doorashada- waxa aad ka faa'iideysaneysaa waqtiga goobaha cod dhiibashada lagaama doonayo in aad horay wax u soo qaadato.
- Si aad isaga diiwaan geliso barta internetka, soo booqo mnvotes.gov/register ugu dambeyn **Talaado, OKtoobar 14.**

Iska diiwaan geli goobaha cod dhiibashada

- Waxa aad iska diiwaan gelin kartaa goobaha cod dhiibashada xilli hore ama Maalin Doorashada.
 - Si aad goobaha isaga diiwan geliso, waa in aad keentaa caedyn muujjineysa in aad degan tahay magaalada sida ku cad bogga **Tilmaamaha Is Diiwaan Gelinta Maalinta Doorashada** ee buuggan.
- Waxa kale oo aad is diiwaan gelinta ku soo diri kartaa boostada



Isku Diiwaangelinta Boostada Aad Ku Soo Dirto

Goorma iyo sidee loo codsadaa in aad boostada ku soo dirto is diiwaan gelinta

- Dib ha u dhigan ilaa daqiiqadda ugu dambeysa in aad codsato! Waxa aan idinkula talineynaa in aad codsataan ugu dambeyn **Oktoobar 28**.
- Waxa aad codsan kartaa taariikhda, laakiin maalin kasta waqtiga ayaa sii yaraanaya si laguugu soo diro kaarka cod dhiibashada.
- Halkan ka baro sida codkaaga vote.minneapolis.gov/voters/vote-by-mail ama soo wac 311.

Taariikhda kama dambeysta ah iyo sida laguugu soo diri karo kaarka cod dhiibashada



Kaarkaaga cod dhiibashada **lama xisaabay**o haddii ay na soo gaarto Maalinta Doorashada Ka dib

Kaarka cod dhiibashada waa inuu na soo gaaraa **5 galabnimo** ee Maalinta Doorashada haddii aad adigu gacanta ka keeneyso.

Kaarka cod dhiibashada waa inuu na soo gaaraa **8 fidnimo** ee Maalinta Doorashada haddii aad boostada ama shirkada warqadaha geeya aad ku soo direyso.

- **Dib ugu soo dir boostada:** Waxaanu kugu talineynaa **in aad boostada dib ugu soo dirtaan 28 Oktoobat**. Waa in ay na soo gaartaa 8 fidnimo ee Maalinta Doorashada Marka lagu soo dhaawado Maalinta Doorashada, tixgeli in aad gacanta ka keento.
- **In aad gacanta ka keento:** Keen Xafiiska Adeegga Doorashooyinka iyo Codeeyayaasha (980 E Hennepin Ave) **saacadaha shaqada**. Waxa kale oo aad keeni kartaa xilliga cod dhiibasha ee Cod Dhiibashada Xilli Hore.
- **Keenidda Maalinta Doorashada:** Keen Xafiiska Adeegga Doorashooyinka iyo Codeeyayaasha (980 E Hennepin Ave) inta u dhaxeyso 8 aroornimo ilaa 5 galabnimo. Ha keenin kaarka cod dhiibashada goobaha codeynta dhiibashada Maalinta Cod Dhiibashada. Sharci ahaan, ma ogo laan karno in aan qabano kaararka cod dhiibashada goobaha codeynta.

Dareen maka qabtaa in uusan kaarka cod dhiibashadana soo gaarin waqtiga ku haboon?

- Waxa aad codkaaga ka dhiiban kartaa goobta codeynta haddii aan lagaa qaban kaarka cod dhiibashada ee aad boostada ku soo dirtay. Haddii aan kaarka cod dhiibashada horay lagaaga ogolaan, waxaa goobta lagaa siinayaa kaar cusub. Haddii kaarka aad boostada ku soo dirtay na soo gaaro adiguna aad codkaaga dhiibatay, kaarka aad boostada ku soo dirtay lama tirinayo.
- Ka hubi in kaarkaaga cod dhiibashada la diiwaan geliyey halkan mnvotes.gov/track ama waxaa laga hubin karaa goobta cod dhiibashada.




Codbinta boostada ayaa sii socota

Kaarka Cod Dhiibashada Ee Dibadda Ugu Maqan Si Rasmi Ah

Waxaa boostada laguugu soo diraa kaarka codshiibashada mustaqbalka adiga oo aan codsan sanad kasta. Laba siyaabood ayey isu diiwaan gelin karaan Dadka Si Rasmi Ah Dibadda Ugu Maqan:

1. Buuxi Foomka Codeeyaha Si Rasmi Ah Uga Maqan Magaalada oo ku soo celi Xafiska Adeegga Doorashooyinka iyo Codeeyayaasha. Codsiga waxa aad ka heli kartaa: vote.minneapolismn.gov/voters/vote-by-mail/permanent-absentee-voter-application
2. Wax ka bedesho is diiwaan gelinta mnvotes.gov/register



Codkaaga dhiibo xili hore

Goobaha iyo saacadaha

Xarunta Cod Dhiibashada Xilli Hore Ee Minneapolis:


980 E. Hennepin Ave, Minneapolis, MN 55414

- Wax inaad keento lagaa doonayo ma jiraan haddii aad horay isu diiwaan gelisay aadan bedelin magacaaga iyo cinwaankaaga.
- Haddii aad dooneyso in aad is diiwaan geliso ama aad wax ka bedesho diiwaankaaga, keen cadeyn muujineysa in aad magaalada degan tahay. Akhri bogga Tilmaamaha Is Diiwaan Gelinta ee maalinta Doorashada ee liiska waxyaabaha ay kala dooran karaan deganayasha oo dhameystiran.

Axad	Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimce	Sabti
Okt 5	Okt 6 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 7 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 8 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 9 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 10 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 11
Okt 12	Okt 13 <i>Xiran: Maalinta Dadka Dhulka Loogu Yimid</i>	Okt 14 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 15 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 16 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 17 8 a.m. - 4:30 p.m.	Okt 18
Okt 19	Okt 20 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 21 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 22 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 23 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 24 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 25 9 a.m. - 3 p.m.
Okt 26 9 a.m. - 3 p.m.	Okt 27 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 28 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 29 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 30 8 a.m. - 6 p.m.	Okt 31 8 a.m. - 6 p.m.	Noof 1 9 a.m. - 3 p.m.
Noof 2 9 a.m. - 3 p.m.	Noof 3 7 a.m. - 5 p.m.	Noof 4 <i>Waa Maalintii cod dhiibashada! Codkaaga ka dhiibo goobaha cod dhiibashada</i>				

Maalin ka mid ah maalamaha xilli hore ee cod dhiibashada

Maalinta	Goobta	Saacadaha
Talaalada 21ka Oktoobar	Weisman Art Museum 333 E River Pkwy, Minneapolis, MN 55455	10 aroornimo. – 5 galabnimo
Arbaco 22 Oktoobar	Minneapolis Public Service Building 505 4th Ave S, Minneapolis, MN 55415	11 aroornimo – 6 galabnimo
Khamiis 23 Oktoobar	Urban League Twin Cities 2100 Plymouth Ave N, Minneapolis, MN 55411	11 aroornimo – 6 galabnimo
Jimce 24 Oktoobar	Midtown Global Market 920 E Lake St, Minneapolis, MN 55407	11 aroornimo – 6 galabnimo
Isniinta 27 Oktoobar	Webber Community Center 4400 Dupont Ave N, Minneapolis, MN 55412	11 aroornimo – 6 galabnimo



Codkaaga Dhiibo Maalinta Doorashada Ee Goobaha Cod Dhiibashada

Faahfaahinta Maalinta Doorashada

- **Maalinta Doorashada waa Talaado, Nofeembar 4. Goobaha cod bixintu waxaa ay furan yihiin 7 aroornimo - 8 fidnimo**
 - Haddii aad weli safka ku jirto marka la xiro goobta cod dhiibashada, halkaaga joog. Weli waad codeyn kartaa.
- Maalinta Cod Dhiibashada, waa in aad codkaaga ka dhiibataa goobta cod dhiibashada ee lagu xil saaray.
- Wax inaad keento lagaa doonayo ma jiraan haddii aad horay isu diiwaan gelisay haddii aadan bedelin magacaaga iyo cinwaankaaga.
 - Haddii aad dooneyso in aad is diiwaan geliso ama waad wax ka bedesho diiwaankaaga, keen cadeyn muujineysa in aad magaalada degan tahay. Akhri bogga **Tilmaamaha Is Diiwaan Gelinta ee Maalinta Doorashada** ee liiska waxyaabaha ay kala dooran karaan deganayaasha oo dhameystiran.

Hubi goobta aad codkaaga ka dhiiban karto

- Waxaa laga yaabaa in goobta cod dhiibashada is bedeshay tan iyo markii ugu dambeysay ee aad codeysay. Dhamaan codeeyayaashu waa in ay hubiyaan goobaha cod dhiibashada ka hor inta aysan u dhaqaaqin goobta cod dhiibashada.
- Si aad uga digtoonaato in aad tagto goob khald ah, ogoow goobta aad codka ka dhiibaneyso: pollfinder.sos.state.mn.us



Fasaxa shaqada si aad codkaaga u dhiibato

Sida uu dhigayo sharciga Minnesota, waxa aad xaq u leedahay fasax shaqada lagaa siiyo iyada oo aan mushaharkaaga, fasaxaaga sanadka, ama waqtiga fasaxa lagaa jarin. Loo shaqeeyaha fara gelin kuma sameyn karo xuquuqdaada shaqada.

- Taasi waxa ay khuseysaa fasaxa aad qaadato in aad codeyso iyo maalinta cod dhiibashada.
- Waa in lacagta lagu siiyaa xilliga aad u baahan tahay in codkaaga dhiibato haddii ay ku soo beeganto waqtiga shaqada.
- Waxa aad fasax qaadataa oo kaliya inta aad u baahan tahay in aad codeyso.


Qalab cusub oo kaa caawiya cod dhiibashada



ExpressVote waxa uu codeeyayaasha ka caawiyaa in ay buuxiyaan kaarka cod dhiibashada. Waxaa la ogol yahay in la isticmaalo codeynta xilliga hore iyo Maalinta Codeynta magaalada oo dhan.

Waxyaabaha aad ExpressVote ka heleysaan waxaa ka mid ah:

- Farta balbalaaran oo aad dooran kartaan, aad loo iftiimiyo, ama labadaba.
- Shaashad aan waxba ku qorneyn oo loogu talo galay dadka indha la'a ama aan si wanaagsan wax u arag.
- Doorashada oo dib loogu noqdo ka hor iyo ka dib marka la daabaco kaarka codeynta.
- Qalabka maqalka dhagaha oo laga dhageysan karo kaarka codeynta.



Habka Kala Horumarinta Doorashada Codadka

Sanadaha doorashada xubnaha degaanka, waxaa la adeegsadaa Habka Kala Horumarinta Doorashada Codadka (RCV) ee xafiisyada Minneapolis. RCV waa hab codeyn ah oo codkaaga siineyso musharixiinta tartamaya sida aad u kala jeceshahay: doorashada koowad, doorashada labaad, iyo doorashada sadexaad.

Sidee ayaaad u calaamadineysaa kaarka codeynta ee Habka Kala Horumarinta Doorashada Codadka (RVC)

1. Dooro musharaxa kuugu sareeya. Kan waa masharaxaaga koowaad waana kan aad codkaaga siineyso oo marka hore lagu tixgelinayo.
2. haddii aad leedahay doorasho labaad (waajib kuguma aha), waxa aad dooran kartaa musharax kale. Kaas waa inuu ka duwanaadaa musharaxa aad kan koowaad u dooratay.
3. Haddii aad leedahay doorasho Sadexaad (waajib kuguma aha), waxa aad dooran kartaa musharax ugu dambeeya. Kaas waa inuu ka duwanaadaa musharaxa aad kan koowaad iyo labaad u dooratay.


1	1st Choice Select One	2	2nd Choice If any, must be different from your 1st choice	3	3rd Choice If any, must be different from your 1st and 2nd choices
	☐ WEBBER PARK Parks Party ☒ BELTRAMI PARK Parks Party ☐ LOWRY PARK Parks Party ☐ POWDERHORN PARK Parks Party ☐ BOSSEN FIELD PARK Parks Party		☒ WEBBER PARK Parks Party ☐ BELTRAMI PARK Parks Party ☐ LOWRY PARK Parks Party ☐ POWDERHORN PARK Parks Party ☐ BOSSEN FIELD PARK Parks Party		☐ WEBBER PARK Parks Party ☐ BELTRAMI PARK Parks Party ☐ LOWRY PARK Parks Party ☒ POWDERHORN PARK Parks Party ☐ BOSSEN FIELD PARK Parks Party



Si aad xog dheeraad ah uga ogaato Habka Kala Horumarinta Doorashada Codadka (RCV) soo booqo vote.minneapolismn.gov/ranked-choice-voting


Sidee ayaa codkeyga loo tirinayaa?

1. Saraakiisha doorashadu waxa ay tirinayaan codka kuugu horeeya. Haddii masharaxaas uu helo wax ka badan 50% isaga ayaa guuleysta. Haddii aanu guuleysan, waxaa loo gudbayaa talaabada 2aad ee tirinta.



Ma jiro musharax helay wax ka badan 50% ee codadka doorashada koowaad. Waxaa bilaa-banaya tirinta codadka ee talaabada 2.

2. Mushaxa hela codadka ugu yar waa laga reebaa tartanka. Codadkaas waxaa loo wareejiyaa kan codeeyaha u ahaa musharaxa 2aad ee doorashada. Haddii uu mushaxar helo wax ka badan 50% ee codadka ah, kaas ayaa guuleysta.



Codadka [Zac] waxaa loo wareejiyaa kan codeeyaha u ahaa musharaxa 2aad ee doorashada. Lucy ayaa guuleystay.

3. Haddii ay muhim noqoto, nidaamka talaabada 2aad ayaa dib loogu celiyaa ayaa uu musharax guuleysto. Wareeg kasta, Mushaxa (musharixiinta) hela codadka ugu yar ayaa laga reebaa tartanka. Markaas ka dib ayaa codadka loo wareejiyaa doorashada xigta ee musharaxa codeeyaha (haddii uu jiro).



Daawo fidiyoow si wanaagsan uga hadlaya Habka Kala Horumarinta Doorashada Codadka (RCV)!



Waa maxay caawinaadda aan ka heli karo goobaha cod bixinta?

Soo kaxeeyso qofku caawiya

- Waxa aad soo kaxeysan kartaa qof ku caawiya oo aan aheyn loo shaqeeyaha ama ururada shaqaalaha.
- Qofku wuu ku caawin karaa inta aad codkaaga dhiibaneyso, oo ay ka mid tahay miiska codeynta.
- Qofka ku caawinaya saamyn kuma yeelan karo codeyntaada iyo sida aad ugu codeyneyso dadka kale.

Calaamadee kaarka codeynta adiga oo isticmaalaya qalabka loogu talo galay in lagu codeeyo

- Waxa aad isticmaali kartaa qalabka lagu calaamadeeyo kaarka codeynta haddii adaan ku dooran karin qalin.
- Waxa uu leeyahay shaashad balaaran oo aad arki karto, iyo farta xardhan oo cod dheer loogu akhrin karo samaacadda dhagaha.
- Ka dib marka aad tilmaanto doorashadaada, qalabka ayaa ku qoraya doorashadaada.

Caawinaad aad ka hesho shaqaalaha

- Shaqaalaha goobta codeynta ayaa ku caawinaya inta ay socoto codeynta.

Codkaaga dhiibo adiga oo “gaarigaaga aan ka soo dagin

- Haddii aadan soo geli karin goobta codeynta sababo la xiriiir xanuun, shaqaalaha ayaa dibadda kuugu keenaya kaarka codeynta.
- Ka dib marka aad calaamadeyso kaarka codeynta, shaqaalaha cod dhiibashada ee ka kala socda labada xisbi ee ugu weyn ayaa kaa sooq aadaya kaarka oo gelinaya makiinadda si loo diiwaan geliyo .

Taageeradda tarjumada iyo luqadaha

- Waxa aad heli kartaa macluumaadka cod dhiibashada oo luqado kala duwan lagu tarjumay iyada oo muhimadda la siiyey in shaqaalaha noqdaan kiuwo ku hadla luqadaha kala duwan.
- Waxa kale oo aad soo kaxeysankartaa qof xagga luqadda kaa caawiya.



Waa maxay xuquuqdeyda?

Sida ay dhigayaan sharciyada doorashada ee Minnesota, waxa aad xaq u leedahay:

- In aad fasax ka qaadata shaqada iyada oo aan laga jarin mushaharkaaga, fasaxa sanadka, iyo saacadaha fasaxa.
- In aad codkaaga dhiibato haddii aad safka ku jirto 8da fiidnimo.
- In aad isdiiwan geliso Maalinta Doorashada haddii aadheysato cadeynta deganaashaha.
- In aad is diiwaan gelin karto (wacdo) oo qof kale aad u ogolaato inuu kuu saxiixo haddii ay muhim tahay.
- In aad soo kaxeysan karto qof ku caawiya oo aan aheyn loo shaqeeyaha ama ururada shaqaalaha.
- In aad soo kaxeysankarto caruurtaada yaryar waad sookaxeysan kartaa.
- In aad codeyn karto haddii uu qof kale mas'uul kaa yahay haddii aysan maxkamadu kaa qaadin xuquuqda codeynta
- In aad codeyn karto haddii aadan u xirneyn dambi culus oo lagugu helay.
- In aad codeyn karto iyada oo qofna saameyn ku yeelan doorashadaada.
- In aad codsan karto in lagu bedelo kaarka codeynta haddii aad khalad sameyso.
- In aad diiwaan gelin karto cabasho qoraal ah.
- In kaar aad tusaale ahaan u buuxisay u qaadan karto goobta codeynta.



Tilmaamaha is diiwaan gelinta Maalinta Doorashada

Waxaa lagaa doonayaa in aad keento mid ka mid ah cadeymaha deganaashaha Maalinta Doorashada:

1 Aqoonsi sawir leh oo cadeynaya magacaaga iyo cinwaanka aad degan tahay

- Leesinka wadidda gaadiidka ee Minnesota, aqoonsiga wadidda ku meelgaarka ah ama aqoonsi ama cadeyn inaad codsatay.
- Aqoonsi sawir leh ee qabiilada oo muujinaya magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga.

2 Aqoonsi sawir leh iyo qoraal cadeynaya magacaaga iyo cinwaankaaga.

Horay u soo qaado aqoonsi sawir leh ee mid ka mid ah kuwa hoos ku xusan
(taariikhdiisu dhamaatay)

iyo
+

La imoow mid ka mid ah aqoonsiyada la ogol yahay ee hoos ku xusan

(waxaa lagu soo bandhigi karaa qalabka doorashada)

- Leesinka wadida gaadiidka, Aqoonsiga gobolka, aqoonsiga barashada wadida gaadiidka ee gobol kasta.
- Baasaboorka Mareykanka
- Aqoonsiga Ciidamada ama Aqoonsiga dadka soo dagaalamay
- Aqoonsiga qabiilada oo magacaaga, saxiixaaga, iyo sawir leh
- Aqoonsi sawir leh ee Jaamacadda Minnesota, kuliyaadaha, amd kuliyaadaha farsamada
- Aqoonsiga dugsiyada sare ee Minnesota
- Biilasha, xisaabta, ama adeeg aad oo deysatay, oo taariikhsiidu tahay 30 maalmood gudahood ee taariikhda doorashada ee:
 - Telefoonka, Telefishinka, ama internetka
 - Qashinka, korontada, gaaska, ama biyaha.
 - Bangiga ama kaararka deymaha
 - Kirada ama deynta guryaha
- Heshiiska kirada ama heshiiska deganaashaha oo dhaqangal ah Maalinta Doorashada
- Warbixinta Kharashka ardayga

3 Soo kaxeeyso codeeye diiwaan gashan oo cadeynkara cinwaanka aad degan tahay

Codeeye ka tirsan degmada aad degan tahay oo ku soo raaca oo saxiixa cadeyn ah cinwaanka aa degan tahay.

4 Aqoonsi sawir leh ee liiska hoyga ardeyda

Jaamadaha iyo kuliyaadaha waxa ay saraakiisha doorashooyinka u soo diraan liiska ardayda deggan hoyga. Haddii aad ku jirto liiska, tus aqoonsi sawir leh si aad u dhameystirto is diiwan gelinta.

5 Dib ugu noqo is diiwaan gelin horay aadisaga diiwaan gelisay degmada

Haddii aad horay isaga diiwaan gelisay degmada oo aad bedeshay magacaaga ama aad u guurtay degmada gudaheeda, waxa aad u baahan tahay oo kaliya in aad Qaaliyada Doorashada wargeliso magacaaga ama cinwaankaagii hore.

6 Keen waraaq cadeyneysa in aad xilli dambe is diiwaan gelisay

Haddii aad is diiwaan gelisay 20 cisho gudahood ee doorashada, waxaa laga yaabaa in boostada laguugu soo diro Isdiiwaan Gelinta Xilli Dambe Horay u soo qaado oo u adeegso cadeyn muujineysa cinwanka deganaashaha.

7 Soo kaxeeyso qof shaqaale ah oo ka tirsan goobta aa degan tahay

Haddii aad degan tahay goob dadkalagu hayo (guryaha kalkaaliyaasha caafimaadka, hoyga dadweynaha, guryahah dadka lagu hayo) qof shaqaalaha ka tirsana ayaa ku raaci kara si uu u xaqiijiyo cinwaankaaga. Qofka shaqaalaha waa inuu keenaa cadeyn muujineysa in uu goobta ka shaqeeyo.